# City of Seattle

**Mike McGinn, Mayor**

## Siyaasada Asturnaanta iyo Ammaanka Xidhiidhka Internetka (online) ee Magaalada Seattle – Soo-koobitaan

Dhokomentigan wuxu soo koobayaa ururinta, isticmaalka iyo ammaanka macluumaadka Dawlada Magaalada Seattle bogeeda dadweynaha ee internetka. Siyaasada oo dhamaystiran waxa Ingiirisi looga heli karaa: http://www.seattle.gov/pan/privacypol.htm

Macluumaadka halkan lagu soo bandhigay loolama jeedo inuu noqdo heshiis ee waxa loo bixiyey ujeedooyin macluumaad oo keliya.

**Macluumaadka la ururiyey iyo sida loo isticmaalo**

Magaalada Seattle waxay ururisaa macluumaadka gaar ah otomaatik ahaan markaad booqato bogga internetka ee dawlada Magalaada Seattle, sida cinwaankaaga Internet Protocol (IP) address, magaca bogaaga, browserka iyo noocyada nidaamyada shaqada, taariikhda iyo wakhtiga aad bogga booqatay, adeegyada bogga ama bogaga aad booqatay, iyo bogga aad booqatay kahor intaanad booqab boggayaga. Macluumaadkan waxa loo ururiyey ujeedo tirakjoob keliya si loo gargaaro Magaalada Seattle si ay u maamusho bogga internetka Dawlada Seattle.

Marka laga reebo badhitaanada amarka qaba ee ciidamada amniga iyo ijeedooyinka ammaanka bogga internetka, ma jiro isku day kale oo lagu qeexayo isticmaalaha.

**Macluumaadka Qof-ahaaneed**

Ma ururinaa macluumaad qof-ahaaneed oo kula xidhiidha iyada oo mooyaane aad si tabaruc ah noo siiso oo aad email noogu soo dirto, ama ka qaybqaata tirakoob, marti laguugu ahaa liistada cinwaanada, ama guddi ka ah wadahal, buuxiyey foom online ah, ama sameeyey nooc kale ooh awl waxqabad online ah oo la xidhiidha dawlada Seattle iyo Magaalada Seattle.

Macluumaadka loo bixiyo hawl waxa loo adeegsadaa dhamaystirka iyo xogaynta hawshaas.

Magaaladu ma iibiso, kirayso ama bixiso macluumaadka booqdaha, oo ay ku jiraan cinwaanada e-mailada, cidka kale ama urur dibeda ah, haddii mooyaane sharci ahaan loo baahan yahay.

**Helitaanka Dadweynaha ee Macluumaadka**

Xeerka Xogta dadweynaha wuxu u baahan yahay in la soo bandhigo dhamaan xogta dadweynaha haddii oo mooyaane xog gaar ah laga reebo sida waafaqsan Xeerka Xogta Dadweynaha ama sharci kale oo waafaqsan.

**Isticmaalka Kukiiska "Cookies"**

Siyaasada Magaaladu waa in la xadido isticmaalka kukiiska, laakiin kukiiska qaar ayaa loo isticmaalaa si loo waafajiyo sharafta hawsha online ka ah. Kukiiska loo isticmaalo sidaas kuma jiraan macluumaad garasho qof.

**Macluumaadka Xidhiidhka**
Waxaad la xidhiidhi kartaa xubin ka mid ah shaqaalaha Magaalada si aad u hubiso in macluumaadka aan ururino ee tilmaamaya qofkan ee la xidhiidha adiga markaad isticmaasho qaybta Macluumaadka Xidhiidhka ee boga internetka ee Asturnaanta iyo Ammaanka Xidhiidhka Internetka ee http://www.seattle.gov/pan/privacypol.htm#contact.

Haddii aad su'aalo qabto la xidhiidha dhokomentigan, wac Waaxda Tiknoolajiyada Macluumaadka ee 206-684-0600.   Waxaan ku siin doonaa gargaar xagga afkaaga oo waxa laguu keeni turjubaan haddii aad codsato.

**Ammaanka**

Magaaladu waxay ilaalisaa sharafta xogteeda oo dhawrtaa gelitaanka aan la ogolayn ee macluumadka ay hayso.

**Ganacsiga Elektrooniga ah**

Bixinta electrooniga waxa la ogol yahay keliya marka ay jirto tiknoolajiyadu iyo dhawritaano kale oo ilaalinaya maaliyadda iyo xogta halista ah.

**Isk-jiritaanka Musuqmaasuqa Internetka**

Waa siyaasada Magaalada in aanay marna codsan macluumaad qof ahaaneed oo sir ah ama macluumaad maaliyadeed oo ka codsan macmiisha iyada oo u soo diraysa e-mail, ama u soo diraysa e-mail ku xidhan xidhiidhyo bogga internetka ee Magaalada oo lagu codsanayo macluumaad maaliyadeed ama qof ahaaneed oo sir ah.

**Bogaga kale ee Internetka**

Markaad ku xidho bog internet oo kale, kuma jirtid bogga internetka ee Magaalada oo waxa ku qabanaya Ogeysiiskan Asturnaanta.